


U daabac laba bog ahaan, jar oo bac ku jaldiye

Qaawanaanta




Waa maxay korriinka dareenka jidhku?



Carruurtu waxay leeyihiiin



Maalintii toobka/ cambuurka



Qaawanaanta

- Finland qaawanaantu dad badan waxay u tahay dabiici. Qoysasku waxay isla galaan soonada.
- Meelaha dabaasha waa la qabaystaa soonadana waxaa la galaa dharka dabaasha adigoon xidhneyn.
- Ugu sheeg carruurta si munaasab ah, sida ugu habboon.
- Carruuraha qaarkood waxay jecel yihiin inay qaawanaaan.
- Carruuraha qaarkoodna waxay jecel yihiin in ay kaligood qolka dharka isaga bixiyaan kuna gashadaan.
- Tusaale u noqo, in aad adigu qiimeyneysid ulana dhaqanmeysid jidhkaaga iyo kan dadka kaleba si qiimo leh. Uga hadal jidhka si xushmad leh.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Waa maxay korriinka dareenka jidhku?

- Korriinka dareenka jidhku waa ilmaha hamadiisa. Iyo xirfadda ammaanka korriinkiisa.
- Korriinka dareenka jidhka waxaa warbixin laga bixinayaa jidhka, dareenka iyo xuquuqda ilmaha qaab heer ku habboon ah.
- Korriinka dareenka jidhku waa arrin balladhan.
- Hadafkeeduna waa ilmaha badqabkiisa iyo ammaankiisa.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Carruurtu waxay leeyihiin ereyo u gaar ah

- Luqadda finnishka carruurta waxaa loo curiyey ereyo u gaar ah oo ay ku qeexaan jidhkooda iyo khibradahooda.
- Tusaale ahaan pimppi iyo pimppeli waa ereyada ay carruurtu u yaqaanaan xubnaha taranka.
- Unnutus = taabashada xubinta taranka ilmaha
- Korriinka dareenka jidhka = korriinka ilmaha hamadiisa iyo xirfadda ammaanka korriinkiisa.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Maalintii toobka/ cambuurka

- Waa wax caadi ah inay carruurtu tijaabiyaan doorar kala duwan. Way ciyaari karaan jinsiyo kala duwan.
- Isla markaas waxaay baranayaan sharciyada la cidhiidha jinsiga.
- U daa carruurtu inay ciyaaraan doorar iyo ciyaaro kala duwan. Carruurtu khibraddooda iyo tijaabadoodu waa muhiim.
- Isla ilaali inaad carruurtu ku tidhaahdo dharka qaar ama midabada qaar waxaa iska leh wiilasha ama gabdhaha oo kaliya.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



U daabac laba bog ahaan, jar oo bac ku jaldiyeen


Halkeey ka yimaadaan nuunuuyadu?



Mac isii!



Ilimuhu wuu ku raaxeystaa jidhkiisa



Deggenaanshaha isticmaalka musqusha



Halkeey ka yimaadaan nuunuuyadu?

- Carruurtu way xiiseeyaan dhalashada nuunuuyada.
- Carrurta qaarkood waxay waydiyaan sida uu ilmuu urka u galo iyo sida uu uga soo baxo.
- Si furfurnaan leh uga warran ilmaha taranka iyo urka.
- Qoraaladda Väestöliitto ayaa lagaaga siinayaa warbixin sida ad uga warramayso taranka carruurta da'ahoodu kala duwanyihii.
- Uga warran siyaabaha kala duwan ee ilmuu uu qoyska ugu soo biiri karo.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Mac isii!

- In wax laga helo ama la jeclaado waa dareemo caadi ah oo ilmuu dareemo.
- Dareemahaas waa kuwo la jeclaysuo.
- Dareenka magac ugu sheeg ilmaha kuna muuji hadalkaaga inaad qiimeynayso dareenkiisa.
- U sheeg siyaabaha wanaagsan ee ixtiraamka leh ee dareenka ka helidda loo muujin karo.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Iilmuu wuu ku raaxeystaa jidhkiisa

- Carruurtu way baadhaan jidhkooda meel kastoo ka mid ah xataa xubnaha taranka.
- Erayga Unnutus wuxuu tilmaamayaa istaataabashada carruurta yaryar. Waa mid ka duwan ta dadka waawayn.
- Ilmaha yar istaataabashadu way dejisaa oo amni ayay dareensiisaa.
- U sheeg in xubintiisa taranka uu taaban karo kaliya markuu kaligii joogo.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Deggenaanshaha isticmaalka musqusha

- Carrurta qaarkood waxay jecelyihii inay si deggan iyadoo albaabku u xidhanyahay ay isticmaalaan musqusha.
- Ku ixtiraam ilmaha baahidiisa ah in uu musqusha ugu gutto xaajadiisa si deggan.
- Ilmu xaq ayaay u leeyihii inay si deggenaansho leh u isticmaalaan musqusha.
- Carrurta qaarkood ayaa isku wakhti musqusha iyo tuunjiga/booga ku wada fadhiyi kara.
- Dhammaan dadka carruurta la shaqeeya ee barbaariyeaasha ah waxaay helaan tababar ku saabsan daryeelka nadaafadda ilmaha.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus




U daabac laba bog ahaan, jar oo bac ku jaldiyeen

Sideen uga hadlaa jidhka?



Waxyaala dhabta ah ee la yaabka leh.



Sideen uga hadlaa jidhka?

- Marmar hammada ilmuu waxay qofka wayn ku keeni kartaa kalsooni darro, yaab ama xishood.
- Dareenkaaga xun iska ilaali inaad ilmaha u gudbiso.
- Dad badan oo waawayn ayaa u baahan warbixin ku saabsan xaaladaha korriin ee hammada ilmaha iyo taageeriddooda.
- Barigii hore arrinkaasi wuxuu ahaa mid laga aamuso.
- Ilmaha hammaddiisa in laga hadlo waa la tababaraa karaa.



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus



Waxyaala dhabta ah ee la yaabka leh.

- Haddii waalidku uu ka jawaabi waayo su'aalaha ilmaha, ilmuu wuxuu jawaabo ka heli karaa ilmaha kale.
- Badanaa warbixintaasi ma aha mis sax ah ama aamnigu ku jiro.
- Waxaa muhiim ah in ilmuu uu warbixinta ka helo qof wayn oo aammin ah.
- Markasta si xaqiiqadu ay ku jirto oo la fahmi karo ugu jawaab su'aalaha ilmaha.
- "Nuunuuyadu waxaay ka dhashaan caloosha hooyada"



www.vaestoliitto.fi/kehotunnekasvatus

